# Suaalaha Qoyska

## Kaararka Wadahadalka ee Lagu Dhisayo Kalsoonida

**Ujeedada:** Ujeeddada ilo xogeedkaan waa in la helo fikrado su'aalo ah oo ay macallimiintu u adeegsan karaan qoysas luqado badan ku hadla, si ay kalsooni iyo xiriir wadashaqeyn ah ula dhisaan. Tani ma aha liis dhammeystiran oo su'aalo ah, balse waa aragtiyo iyo fikrado laga duuli karo. Su'aalaha waxaa loo qorsheeyey in lagu isticmaalo shaxda ama qaabka kaararka wadahadalka ee WIDA.

**Tilmaamaha:** Dooro dhowr su'aalood oo ku habboon macnaha guud ama samayso mid adiga kuu gaar ah. Uma baahnid inaad isticmaasho sua'aalaha oo idil. Qor su'aalaha aad dooratay in lagu daro qaabka Kaararka Wadahadalka, kaddibna daabac si aad ugu adeegsatid kulanka wadahadalka. Tusaale ahaan, kaararka wadahadallada waxaa loo adeegsan karaa munaasabado kala duwan sida kulan furan, booqasho guri, la kulanka urur bulshada, shirar, ama dhacdo iyo wadahadal kale oo rasmi ah iyo mid aan rasmi ahayn.

**Tixgelinno Marka Loo Adeegsanayo Ardayda, Qoysaska, iyo Xubnaha Bulshada**

- **Heerka Kalsoonida Hadda jirta:** Tixgeli heerka kalsoonida iyo sida uu wanaagsan yahay xiriirka aad la leedahay ardayda, qoysaska, ama xubnaha bulshada. Isticmaalka khasabka ah ee qaabka su'aal iyo jawaab ah marka lagu jiro wejiga hore ee la falgalka ardayda, waalidiinta, ama xubnaha bulshada waxay si aan ula kac ahayn u abuuri kartaa cadaadis, taasoo keeni karta in ay dareemaan isku kalsooni la'aan halkii ay ka heli lahaayeen taageero.
- **Kalsoonidu waxay ku timaadaa siyaabo kala duwan:** Ka fiirso ficillo yaryar oo sababi kara in ardayda, qoysaska, iyo xubnaha bulshada ee luqadaha kala duwan ku hadla ay dareemaan soo dhoweyn iyo qiimeyn. Isticmaal salaamo fudud oo ku qoran luqadahooda hooyo. Haddii aad tahay qof bartay Ingiriisiga ama soo-galooti ah, la wadaag waayo-aragnimadaada; haddii aadan taas ahayn, muuji is-hoosaysiin, qadarin luqadaha qoysaska, iyo rabitaan wax-barasho. Tani waxay gacan ka geysaneysaa dhisidda dareenka iyo isku xirnaanta. Xitaa dadaallada yaryar waxay wax weyn ka tari karaan in ay dareemaan in la arkayo oo la aqoonsan yahay.
- **Kalsoonidu waxay qaadataa waqti:** Muuji inaad tahay qof furfuran oo soo dhaweyn leh, isla markaana qiimeeya heerka ay marayaan ardayda, qoysaska, iyo xubnaha bulshada ee luqado badan ku hadla marka ay la falgalayaan. Tani waxay ka dhigan tahay in la dhegaysto sheekooyinka iyo baahiyaha ay qabaan, lagana jawaabo talooyinkooda iyo fikradahooda, lala xiriiro goobo ay iyagu doorbidaan, lagana shaqeeyo abuurista fursado iskaashi oo macno leh. Ka dhig dhisidda xiriirka mid joogto ah oo si ula kac ah loo fuliyo.

WIDA™
UNIVERSITY OF WISCONSIN–MADISON

wida.wisc.edu

WIDA is housed within the School of Education at the University of Wisconsin-Madison.
© 2025 Board of Regents of the University of Wisconsin System, on behalf of WIDA

# Su'aalo ay Macallimiintu U Adeegsan Karaan Qoysaska

## Bilowga Dhisidda Xiriirka

### Qoyskaaga

1. Maxay waxyaalaha nooca ee uu jeecelyahay _____ [magaca ilmaha] in uu sameeyo? Maxaad jeceshahay inaad sameysaan ka qoys ahaan?
2. Waa maxay qiyamka qoyska ama dhaqanka ee adiga muhiimka kuu ah? Miyaad nala wadaagi kartaa sheeko ku saabsan midaan ama tusaalaheeda?
3. Waa maxay mahadhada aad soo martay ee aad jeclaan lahayd inaan ogaano si aan si wanaagsan u taageerno qoyskaaga?
4. Maxaa kale oo aad jeclaan lahayd inaan ka ogaanno _____ [magaca ilmaha] iyo qoyskaaga?

### Xiriirka Dugsiga

5. Maxaad ka filaysaa dugsigeenna? Maxaad jeclaan lahayd inaad ka ogaato dugsigeena?
6. Ma nala wadaagi kartaa tusaale qof aad si buuxda ugu kalsoontahay oo ka tirsan dugsigeenna, iyo sababta aad ugu kalsoontahay?
7. Maxaad rajaynaysaa in _____ [magaca ilmaha] uu barto sannadkan? Waa maxay himilooyinka luqadda ee aad ka leedahay _____ [magaca ilmaha]? Waa maxay yoolalka waxbarasho ee aad u haysaa _____ [magaca ilmaha]?
    a. Muxuu _____ [magaca ilmaha] aad ugu fiican yahay? Maxaad u malaynaysaa in _____ [magaca ilmaha] u baahan yahay inuu ka shaqeeyo?
    b. Waa maxay habka ugu wanaagsan ee aan uga taageeri karno _____ [magaca ilmaha] xaga horumarka luqaddiisa iyo waxbarashadiisa? Horumarka bulshada iyo dareenka?
8. Maxaan sameyn karnaa si adiga iy _____ o [magaca ilmaha] aad ugu dareentaan soo dhawayn dugsiga/fasalka?
9. Maxaan kaga caawin karnaa si uu _____ [magaca ilmaha] si fiican ugu wanaasganaado dugsiga?

### Xiriirka Bulshada

10. Miyuu jiraa shaqsi ama urur aad si badan ugu kalsoontahay oo uu ahaa mid adiga ku caawiya? Miyaad nala wadaagi kartaa tusaale sida aad kalsoonida u kobciso?
11. Waa maxay kheyraadyada bulshadeed ee aad hada isticmaasho ee laga yaabo inay waxtar u yeeshaan qoysas kale?
12. Waa maxay kheyraadka bulsho ama kuwo kale oo aad u aragto inay waxtar kuu leeyihiin?

## Horumarinta Xiriir Joogto ah oo Sii Socda

### Qoyskaaga

1. Tan iyo hadalkeenii ugu dambeeyay, ma jiraan wax isbeddel ah oo ku yimid waxyaabaha _____ [magaca ilmaha] xiiseeyo?
2. Kolkii isku keen dambaysay ee aanu wada hadalney, waxaad tiri _____. Sidee ayeey tani isku badashay, ama wali ma sidii baa?

### Xiriirka Dugsiga

3. Waa sidee sida ay hada wax ugu socdaan _____? (la wadaag xiriirka dugsi gaar ah ee aad horay wada hadal ula yeelatay.) Maxaan samayn karaa sifo aan u taageero?
4. Sidee bay isugu beddeleen yoolalkaaga la xiriira waxbarashada, luqadda, iyo/ama dhaqanka ee _____ [magaca ilmaha], tan iyo markii ugu dambaysay ee aan wada hadalnay haddii isbeddel jiro?
5. Maxaa si wanaagsan ugu shaqeynayay iskaashigeenna illaa iyo hadda? Miyaad nala wadaagi kartaa tusaale?
    a. Maxaa isbadal ah aanu samayn karnaa si aanu kaaga yeelno mid dareema soo dhawayn/la maqlay cabashadiisa?
    b. Sideen uga jawaabayaa su'aalahaaga ama u daboolayaa baahiyahaaga?
    c. Sideen xiriirkeenna uga dhigi karnaa mid iskaashi dheeraad ah ku saleysan?
6. Ma u malaynaysaa in dugsigu buuxinayo waxyaalaha aad filaysay? Maxaanu samayn karnaa si aanu wax u sii wanaajinno?
    a. Isbeddel noocee ah ayaad jeclaan lahayd in la arko si loo sii xoojiyo dhaqanka kalsoonida iyo ixtiraamka ee u dhexeeya dugsiga iyo qoysaska luqadaha badan ku hadla?




WIDA is housed within the School of Education at the University of Wisconsin–Madison.
© 2025 Board of Regents of the University of Wisconsin System, on behalf of WIDA